**Kulanka Guddiga Maamulka Maaliyadda (FGC)**
**Kulankii 70aad – 1-da Sebtember 2025, Muqdisho, Soomaaliya**

## Guudmar

Guddiga Maamulka Maaliyadda (FGC) ayaa kulankoodii 70-aad ku yeeshay magaalada Muqdisho 1-dii Sebtember 2025. Xubnaha guddida ayaa waxay ka wada hadleen arrimaha mudnaanta u leh maamulka iyo hufnaanta maaliyadeed, oo ay ku jiraan hannaanka dib-u-eegista dastuurka, waxqabadka Soomaaliya ee Tusmada Aragtida Musuqmaasuqa (CPI), maareynta kheyraadka dabiiciga ah, dadaallada cusub ee dekkedaha iyo garoomada diyaaradaha, kordhinta dakhliga, iyo kormeerka mashaariicda. Kulanka ayaa dib u eegis ku sameeyay horumarka dib-u-habeynta, waxaa lagu aqoonsaday meelaha u baahan tallaabo dheeraad ah, waxaana lagu heshiiyay tallaabooyinka xiga ee lagu horumarinayo daahfurnaanta maaliyadeed iyo dib-u-habeynta dowladnimada ee Soomaaliya.

## Dib u Eegista Dastuurka

Guddiga ayaa dib u eegis ku sameeyay horumarka geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka, iyadoo xoogga la saarayo in la caddeeyo qodobbada ku saabsan dhulka, hantida dadweynaha iyo doorka hay'adaha maaliyadeed sida Bangiga Dhexe.

## Tusmada cabbirka Musuqmaasuqa ee Soomaaliya

Guddiga ayaa soo bandhigay sida loo soo uruuriyo tusmada aragtida musuqmaasuqa iyo heerka Soomaaliya tobankii sanno ee la soo dhaafay. Xubnuhu waxay hoosta ka xariiqeen baahida loo qabo dadaallada isku dubarida ee dowladda oo dhan si loo xoojiyo tallaabooyinka la dagaallanka musuqmaasuqa iyo hagaajinta darajooyinka mustaqbalka. .

## Maamulka Ilaha dabiiciga ah:

Warbixino kala duwan ayaa laga soo saaray Batroolka. Guddiga ayaa dhegaysatay horumarka dib u gorgortanka qaar ka mid ah heshiisyada bartoolka iyadoo la raacayo talooyinkii hore ee guddida (FGC). Guddiga ayaa sidoo kale ka hadlay baahida loo qabo in DFS ay qaaddo tallaabo lagu xallinayo dhibaatooyinka hadda jira ee heshiisyada kale. Xubnaha ayaa sidoo kale ka wada hadlay muhiimadda ay leedahay helitaanka taageero farsamo si loo sameeyo wareegga shatiga tartanka. Marka laga hadlayo kalluumeysiga, Guddigu wuxuu dib u eegay horumarka shatiga tuna ee 2025 wuxuuna isku raacay muhiimadda ay leedahay xaqiijinta dakhliga iyo in la hubiyo wadaagga dowladaha dhexdooda.

## Dhismaha Dekedda iyo Airport ka

Guddiga ayaa ka wada hadlay caqabadaha jira ee Dekedda Muqdisho iyo qorsheynta dhismaha Dekedda cusub ee Muqdisho. Daraasad hordhac ah oo dhammaystiran ayaa horey loo sameeyay. Muhiimadda ay leedahay maalgelinta hufan iyo qandaraaska horumarinta dekedda cusub ayaa la

iftiimiyey intii lagu gugojiray dooddan. Madaarka cusub ee Muqdisho, xubnuhu waxay dib u eegis ku sameeyeen qorshayaasha lagu sameynayo daraasad buuxa oo suurtagal ah iyo ka qaybgalka maalgashadayaasha, iyagoo hoosta ka xariiqay baahida loo qabo in la caddeeyo mas'uuliyadaha hay'adaha iyo u hoggaansanaanta qawaaniinta Soomaaliya iyo kuwa caalamiga ah.

**Dakhliga**

Guddiga ayaa dib u eegis ku sameeyay horumarka uruurinta dakhliga gudaha iyo dib-u-habeynta. Cusboonaysiinta ayaa iftiimisay dib-u-habeynta socota ee hoos yimaadda Qorshaha Dakhliga Dhexe, oo ay ku jiraan hirgelinta Sharciga cusub ee Canshuuraha Dakhliga iyo in si buuxda loogu guuro nidaamka SOMCAS. Xubnuhu waxay xuseen horumarka loo wajahayo bartilmaameedyada IMF, iyagoo sidoo kale carrabka ku adkeeyay halista maaliyadeed ee la xiriirta dhimista gargaarka ee dhowaan la sameeyay.

**Korjoogtenta Mashaariicda iyo Qandaraasyada**

Guddiga ayaa tixgeliyay dhowr arrimood oo la xiriira qandaraasyada, oo ay ka mid yihiin qandaraaska baasaboorka, kordhinta adeegyada fiisaha, qandaraaska dakhliga kirada, iyo raashinka ciidanka amniga. Xubnuhu waxay carrabka ku adkeeyeen baahida loo qabo geeddi-socodka wax soo iibsiga waqtigeeda, daahfurnaanta, iyo ka fogaanshaha kordhinta qandaraaska ee muddada dheer. Wasaaradda Maaliyadda ayaa xaqiijisay in ay socoto shaqo muhiim ah oo lagu taageerayo hay'adaha ay khuseyso diyaarinta dukumiintiyada qandaraaska iyo in la dhameystiro hannaanka qandaraaska muddada lagu heshiiyay.

**Gunaanad**

Guddoomiyaha Guddiga, Wasiirka Maaliyadda, Mudane Biixi Iimaan Egeh, ayaa soo gabagabeeyay kulanka isagoo ku celceliyay doorka muhiimka ah ee FGC ee habeynta ajendaha hufnaanta maamulka maaliyadeed ee Soomaaliya. Xubnuhu waxay mar kale xaqiijiyeen sida ay uga go'an tahay xoojinta daahfurnaanta, adkeynyta hay'adaha, iyo isla xisaabtanka maaliyadeed. Qodobbada waxqabadka ayaa lagu heshiiyay dhammaan qodobbada ajandaha.